



Coalition for Somali Political Parties

IXS/GF/020/16

Mogadishu, 29 August, 2016

WAR SAXAAFADEED

UJEEDDO: FARAGELINTA ODOYAAL DHAQAMEEDKA 135-TA AH

Isbahaysiga Xisbiyada Soomaaliyeed wuxuu si wayn uga soo horjeedaa faragelinta gurraacan & gacma-gacmeynta sharci-darrada ah ee qaar ka mid madaxda Madasha Qaran ay ku sameynayaan liiska Odayaal Dhaqameedka 135-ta ee la isku raacay shirkii Baydhabo dabayaaqadii bishii Juun 2016.

Isbahaysigu wuxuu xog ku helay in Madaxweyne Xasan Sheekh uu maalmihii ina dhaafay dadaal aan kala go' lahayn u galay in uu magacaabo Oday cusub oo ay beesha reer Aw-xasan yeelato, si uu ugu sadburiyo saaxibkiis Faarax Sheekh C/qaadir oo u tartamaya xilka xildhibaanimo ee Beesha Reer Aw-xasan sanadka 2016-ka.

Faarax oo horay isaga dartiis uu Madaxweynuhu labo xukuumadood xilka uga tuuray, tii saddexaad ay sigatay ayaa sabab u ahaa xasilooni-darri siyaasadeed in dalka iyo dawladnimada Soomaaliya ay gasho, haddana la doonayaa in hanaankii doorashada awgiis loo afduubo.

Isbahaysiga Xisbiyadu marna ma aqbali doono isbedel lagu sameeyo liiska odayaasha dhaqanka ee 135-ta ee la isku raacay. Keliya wuxuu Isbahaysigu aqoonsanyahay sidii uu horay u cadeeyey in liiska lagu soo daro **Ugaas Xasan Ugaas Khaliif Ugaas Rooble** oo ay madaxda Madasha, Isbahaysiga Xisbiyadda, Dhaqanka Soomaaliyeed iyo Beesha Caalamkuba u aqoonsan yihiin in uu yahay Ugaaska Beesha Xawaadle si midaysan u duubatay.

Isbahaysigu wuxuu canbaaraynaa falka gurraacan ee sharci-darrada ah ee uu Gudoomiyihii hore ee Baarlamaanka **Mudane: Maxamed Cismaan Jawaari** uu ku go'aansaday soo saarista warqad ku summadaysan **1360/19/1/9/16**, soona baxdey taariikh: **26 August 2016**, taasoo uu kaligiis ku sheegtay in uu metelo Madasha, kuna saxiixay oday cusub oo ka dheeri ah odayaashii dhaqanka ee tiradooda aheyd 135-ta, ayadoo aysan madashuna xaq u laheyn faragalinta liiska odayaasha.

Wuxuu Isbahaysigu ka walaacsan yahay in Madasha Qaran ee laga filayey daah-furnaan, miisan iyo isku dheelitirnaan siyaasadeed ay noqotay gole uu Musharax Xasan Sheekh marsiisto danihiisa gaarka ah, taasoo yeelatay muuqaalka guddigii ololaha musharax Xasan Sh.

Isbaheysigu wuxuu u arkaa dhacdadaan mid lagu xalaaleysanayo dhimista awoodda odoyaashii 135-ta ah, bedelidda odoyaasha ay u arkaan ineysan u janjeerin dhankooda iyo kordhinta tirada odoyaasha, taasoo halis galineysa hanaanka doorashada iyo qabsoomidda doorasho xalaal ah, isla markaana keeni karta xasilooni darro siyaasadeed iyo mid amni oo soo korodha.

Isbahaysigu wuxuu uga digayaa Guddiga Doorshadda Dadban ee heer Federaal iyo heer Maamul Goboleed, in aysan faraha la gelin liiska odayaasha ee la isku raacay. Wuxuu Isbahaysigu Odayaasha dhaqanka ee liiska 135-ta ugu baaqayaa in ay ka hor yimaadaan faragelinta qaawan iyo qaabka la doonayo in lagu sicir barariyo liiska odoyaasha.

Wuxuu Isbahaysigu ku wargelinayaa Qaramada Midoobay iyo xubnaha kale ee beesha caalamka ee taageeraya doorashada Soomaaliya in ay halis soo food saartay hufnaanta hanaanka doorashadda Soomaaliya, ayadoo loogu baaqayo in ay qaadaan tallaabo lagu **badbaadinayo** hanaanka doorashada dalka, oo aysan noqon kuwa hortooda lagu musuqmaasuqa doorashadii ay xoogga iyo xoolaha badan ku bixiyeen.

Dhammaad